

Fasalada Xanaanada ilaa Fasalka Shanaad ee Dugsiga District 196

Sharaxaadaha Koodhadhka Dhibcaynta Caadooyinka Shaqada &

	1 – Xaddidan	2 – Horumar samaynayo	3 – Aqoon fiican u leh	4 – Tusaale mudan
Si madax banaan ayuu u shaqeeyaa	Ardaygu ma awoodo inuu si waxtar leh u shaqeeyo asagoon hagd ka helin qof weyn. Ardaygu si sahal ah ayaa loo mashquuliyaa.	Ardaygu xoogaa wuu madax-banaan yahay, si kastaba ha ahaatee, wuxuu muujiyaa hab-dhaqan ka inuu ka mashquulo hawsha. Waxaa hagi kara qof weyn.	Ardaygu badanaa waa mid wax soo saar leh oo ka qayqaatay. Wuxuu u baahan yahay hagiitaan yar.	Ardaygu aad buu ugu hawlan yahay mar kasta. Ardaygu wuxuu qaadanayaa mas'uuliyadda waxbarashada.
Raac xeerarka dugsiga/fasalka	Ardaygu wuxuu u baahan yahay faragelin joogto ah oo ka timaada dadka waaweyn iyo xusuusin joogto ah oo laga siiyo xeerarka dugsiga iyo fasalka. Habdhaqanku waxay si joogto ah u carqaladaynaysaa jawiga dugsiga. Way ku adag tahay inuu ilaaliyo habdhaqanka ku habboon marka la saxo ka dib.	Ardaygu si toos ah uma raaco xeerarka dugsiga iyo fasalka. Mararka qaarkood wuxuu uga baahan yahay faragelin iyo xasuusin dadka waaweyn. Caadiyan ma awoodo in uu sii wado habdhaqanka ku habboon ka dib markii la saxo.	Ardaygu wuxuu sida caadiga ah raacaa xeerarka dugsiga iyo fasalka. Ardaygu badanaa wuu xtiraamaa dadka waaweyn iyo ardayda la dhigta fasalka. Marar dhif ah ayuu uga baahan yahay jiheynta ama sixitaanka dadka waaweyn.	Ardaygu wuxuu si joogto ah u raacaa xeerarka dugsiga iyo fasalka. Ardaygu waad mid ixtiraamaa dadka waaweyn iyo ardayda la dhigta fasalka. Ardaygu wuxuu dhiirigeliyaa oo taageeraa ardayda kale ee la dhigta fasalka.
Wuxuu dhamaystiraa hawlaha waqtigii loogu talagalay (Fasalka 1-5 kaliya)	Ardaygu si dhif ah ayuu u dhammeeyaa oo u soo gudbiyaa hawlaha wakhtiga loogu talagalay. Ardaygu wuxuu uga baahan yahay inuu had iyo jeer xasuusiyo macalinka shaqada uusan soo gudbinin ama uusan dhamaystirin. Shaqooyinka mar kasta qayb kaliya ayaa laga sameeyaa.	Ardaygu si aan toos ahayn ayuu u dhammeeyaa oo u soo gudbiyaa hawlaha wakhtiga loogu talagalay. Ardaygu wuxuu uga baahan yahay marmar uu xasuusiyo macalinka shaqada uusan soo gudbinin iyo uusan dhamaystirin. Shaqada mararka qaar qayb ayaa laga sameeyaa.	Ardaygu badanaa waxuu dhammeeyaa oo u soo gudbiyaa hawlaha wakhtiga loogu talagalay. Ardaygu marar dhif ah ayuu u baahan yahay in la xasuusiyo shaqada uusan soo gudbinin ama uusan dhamaystirin. Shaqada badanaa waa la bogaa gabi ahaan.	Ardaygu wuxuu si joogta ah ugu dhamaystiraa shaqada waqtigii loogu talagalay si sax ah oo dhamaystiran.
Wuxuu muujiyaa xirfadaha maamulka	Ardaygu ma nidaamsano inta badana ma awoodo inuu helo agabyada iyo shaqooyinka loo diro. Waqti badan ayuu ku lumiyaa raadsashada alaabaha. Haddii ay khusayso, ardaygu ma isticmaalo buug-yaraha shaqada.	Ardaygu wuxuu muujiyaa maamul aan is waafaqsanayn. Badanaa wuu awoodaa inuu helo agabyada iyo shaqooyinka loo diro, laakiin wuxuu uga baahan yahay caawimo iyo feejignaan joogto ah macalinka. Haddi ay khusayso, ardaygu iskuma waafaqsana isticmaalka buug lagu qoro shaqada loo dhiibay wuxuuna u baahan yahay caawinta macalinka.	Ardayga badanaa wuu nidaamsan yahay. Si fudud ayuu u heli kara agabyada iyo shaqooyinka. Haddii ay khusayso, ardaygu wuxuu uga baahan yahay caawimo marmar ah macalinka marka uu isticmaalayo buug lagu qoro shaqada loo dhiibay.	Ardayga aad ayuu u nidaamsan yahay. Wuxuu haystaa nidaamka meelaynta iyo kaydinta agabyada iyo buugaagta lagu qorto shaqada loo diray. Wuxuu si degdeg u heli kara alaabta marka loo baahdo. Haddi ay khusayso, ardaygu si madax banaan buu u isticmaala buuga lagu qoro shaqada loo dhiibay.

Fasalada Xanaanada ilaa Fasalka Shanaad ee Dugsiga District 196

Sharaxaadaha Koodhadhka Dhibcaynta Caadooyinka Shaqada & Xirfadaha

	1 – Xaddidan	2 – Horumar samaynayo	3 – Aqoon fiican u leh	4 – Tusaale mudan
Wuu dhegaystaa wuxuuna raacaa tilmaamaha	Ardaygu ma awoodo in uu fiiro gaar ah u yeesho qofka hadlaya oo inta badan waxa uu u muuqdaa mid mashquulsan. Aan awoodin inuu u hoggaansamo tilmaamaha bilowga ah wuxuuna u baahan yahay in macalinka dib u hago.	Ardaygu si joogto ah fiiro gaar ah uma yeesho qofka hadlaya oo marmarna waxa uu u muuqdaa mid mashquulsan. Si aan toos ah uguma hoggaansamo tilmaamaha wuxuuna baahan yahay in marmar dib loo hago.	Ardaygu badanaa wuxuu u leeyahay fiiro gaar ah qofka hadlaya oo marar dhif ah u muuqdaa mid mashquulsan. Caadiyan wuxuu awoodaa inuu u hogaansamo tilmaamaha ugu horeeyay.	Ardaygu si joogto ah ayuu fiiro gaar ah ugu yeeshaa qofka hadlaya. U hogaansamaa tilmaamihii hore. Wuxuu muujiyaa kartida uu ku caawinayo dadka ficiisa ah tilmaamaha la siiyo.
Si fiican ula falgala dadka kale	La falgalka ardayga ee dadka kale waxa inta badan lagu gartaa isku dhac iyo faallooyin aan habboonayn. Ardaygu ma awoodo inuu si wada jir ah ugu shaqeeyo koox ahaan.	Ardaygu in yar buu la falgala dadka kale. Ardaygu waxa uu sameeyay is dhexgal aan habboonayn marmar. Inta lagu jiro shaqa kooxeedka, ardaygu inta badan wuxuu u muuqdaa qof kormeere ah.	Ardaygu wuxuu caadi ahaan ula dhaqmaa si ku habboon oo ixtiraam leh kuwa kale. Ardaygu inta badan si buuxda ayuu uga qayb qaataa shaqa kooxeedka.	Ardaygu wuxuu si joogto ah ugu muujiyaa ixtiraam iyo isdhexgalka wanaagsan dadka kale. Wuxuu qaataa mas'uuliyadaha hoggaaminta ee shaqa kooxeedka.
Aqbalaa xaaladaha cusub iyo kuwa kala duwan (Fasalada xanaanada oo kaliya)	Ardaygu ma awoodo inuu hawlaha u wajaho dabacsanaan iyo halabuurnimo. Ardaygu ma awoodo in uu la qabsado oo uu aqbaloo isbeddelada loogu sameeyo rootiinada iyo hawlaha.	Ardaygu si aan joogto ahayn ayuu hawlaha ugu wajahaa dabacsanaan iyo halabuurnimo. Ardaygu si aan joogto ahayn ayuu ula qabsadaa oo u aqbalaa isbeddelada ku yimaada rootiinka iyo hawlaha.	Ardaygu wuxuu badanaa ku wajahaa hawlaha dabacsanaan iyo halabuurnimo. Ardaygu caadi ahaan wuu laqabsadaa oo aqbalaa isbeddelada ku yimaada rootiinka iyo hawlaha.	Ardaygu si joogto ah ayuu ugu wajahaa hawlaha dabacsanaan iyo halabuurnimo. Ardaygu si joogto ah ayuu ula qabsadaa oo u aqbalaa isbeddelada ku yimaada rootiinka iyo hawlaha.